



# Fursada Tallaalka COVID-19 ee Ardayda Da'doodu Tahay 12 sanno iyo Wixii ka Weyn

Maayo 14, 2021

Todobaadkani, Hay'ada Caafimaadka Oregon waxa ay ku dhawaaqday ansixinta tallaalka Pfizer kaasi oo la qaato labada jeer in la siin karo dadka da'doodu tahay 12 sanno iyo wixii ka weyn. Xarunta Lagu Qabto Shirweynayaasha Oregon (Oregon Convention Center) hadda waxa ay u furan tahay inay siiyaan dadkaas aan soo sheegnay tallaalka BILAASH ah: Waad tegi kartaa adiga oo aan wax ballan ah qabsan ama waxaad ballan ka qabsan kartaan shabakada [Tallaalka Qoyska iyo Ardayda](#). Maalinta xigta ee Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) ay tallaalka ka qaadan doonaan Xarunta Shirwaynayaasha Oregon (Convention Center Oregon) waxa weeye maalinta Arbacada, bisha Maayo 19.

Ardayda da'doodu u dhaxayso 12 ilaa 14 sanno waa inay la socdaan waalidiintooda, daryeelayaashooda, ama qof kale oo loo soo wakiishay waalid ahaan. Haddii uu ardaygu la socda qof weyn oo aan ahayn waalidkiisu, ardaygu waa inuu sitaa foom ay soo saxeexeen waalidkiisu; iyada oo aanu qoysaska la wadaagi doonaa foomam luqadooda lagu turjumay maalinta Isniinta.

Maalinta Arbacada ah waxaa diyaar u ah qoysaska gaadiidkii ay raaci lahaayeen iyo turjubaano ka caawiyo dhinaca turjumida. Gaadiidka la raacayo (waxaa loo diyaariyey ardayda iyo xubnaha qoysaska labadaba) kuwaasi oo ka baxaya iskuulada Alliance @ Meek, Franklin, Ida B. Wells, McDaniel @ Marshall, iyo Roosevelt, waxayna geyn doonaan Convention Center, iyaga oo marka ay ka soo noqonayaana ku soo celin doona iskuulkii ay markii hore ka soo qaadeen. Waqtiyada gaadiidku baxayaan waxaa lagu soo qori doonaa shabakadeena. Teendhada lagu caawinayo ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) sidoo kalena lagu siinayo macluumaadkii ay u baahnaayeen waxay ku taalaa xagga hore ee Xarunta Shirweynayaasha Oregon (Convention Center Oregon).

Xog fara badan oo ku saabsan arrintani ayaad heli doontaa maalinta Isniinta. Waxaan idiin rajeyneynaa inaad fursadan ka faa'iideysan doontaan sidii aad isku tallaali lahaydeen, iyada sidoo kalena aan idiin rajeyneyno nabadgelyo iyo todobaadka dhammaadkiisa oo nabada ah.